

## Bayaanka Saameynta Sinnaanta: Heshiiska Caafimaadka iyo Badqabka Midowga Macalimiinta Boston

Cinwa SY 2022-23 Heshiiska Caafimaadka iyo Badqabka Midowga  
anka: Macalimiinta Boston:

Taariikhda: 9/28/22

Miyaa [Racial Equity Planning Tool](#) la isticmaalay?  Haa  X Maya

Hadday haa tahay, geli taariikhda(yada) shirarka REPT oo isku xidhka REPT ee dhammaystiran halkan: \_\_\_\_\_

Xubin ka tirsan Qaybta Sinnaanta, Istaraatijiyada iyo Nusqaamaha Fursadaha miyuu dib u eegay bayaankan?  Haa  Maya

Qaybha Habka Qorshaynta Sinnaanta Midabka Jinsiga BPS	Si Kooban/Sababta
<b>1. Qalqaalo/Soojeedin &amp; Saamaynta</b> <i>Waa maxay natiijooyinka la rabo ee codsiyada/dadaalada, oo ay ku jiraan ka saarida meesha khilaafka? Yaa horseeday shaqadan/qorshaynta, oo miyay ka tarjumayaan aqoonsiga kooxda ardayda BPS iyo qoysaska (kooxaha muhiimka ah waxaa ka mid ah shakhsiyadka madow, Latinx, Aasiyaan, asal ahaan, soo galooti, lugado badan, oo leh khibrad Waxbarasho Gaar ah)?</i>	<p>Heshiiska Is-Afgaradka (MOA) ee u dhaxeeya Gudida Dugsiga Boston (BSC) iyo Midowga Macalimiinta Boston (BTU) wuxuu faahfaahinayaa nidaamyada Caafimaadka iyo Badqabka ee sanad dugsiyeedka 2022-23. Heshiiska waxa loogu talogalay in lagusii wado dadaal kasta oo qof waxbaraso gaara ku jira iyadoo la hubinaayo caafimaadka iyo badqabka ardeyda, qoysaska, barayaasha, iyo shaqaalaha kale ee hugsiga iyo degmada. Xanuunku wuxuu kusii leeyahay saameyn xun xubnaha bulshooyinka taariikh ahaan takooro, oo heshiiskanina wuxuu qeyb muhiima ka yahay istaraatijiyada guud ee degmada iyo Magaalada oo lagu yareynaayo saameynahaas.</p> <p>Kooxaha BTU iyo degmada ee ka xaajoonaya, taasoo si weyn uga turjumaysa xogta ardeydeena iyo qoysaskeena, ayaa qoray heshiiskan.</p>
<b>2. La jaanqaadida Qorshaha Istaraatijiga ah</b> <i>Sidee baa qorshaha istaraatijiga degmadu u waafaqsan yahay codsiga/dadaalka?</i>	<p>Heshiiskani waxay la socotaa ballanqaadyada soo socda ee Qorshaha Istaraatijiga ah:</p> <p>2.7 Ka dhig dugsi kasta meel ammaan u ah arday kasta oo BPS ah, oo bixiya taageerada iyo ilaalinta loo baahan yahay si ay wax u bartaan, u koraan, oo u koraan.</p> <p>5.4 Ka dhig BPS meel ay barayaasha iyo shaqaaluhu rabaan in laga shaqeeyo sababtoo ah waxay diiradda saarayaan u adeegida ardaydeena waxayna dareemaan in lagu qiimeeyo laguna taageeray shaqadooda.</p>
<b>3. Falanqaynta Xogta</b> <i>Xogtee ayaa la falanqeeyey? Miyaa lagula kala saaray jinsiga iyo kooxa kale? Maxay muujisay oo khuseysa kala duwanaanshaha?</i>	<p>Waayo xogta degmada iyo Magaaladu waxay muujinaysaa in xanuunka COVID-19 si weyn u saameeyey ardeyda iyo shaqaalaha Madowga iyo Casaanka ah, iyo ardeyda iyo shaqaalaha naafada ah, waxa aad u muhiima in aynu raacno talooyinka Komishanka Caafimaadka Dadweynaha Boston si aad uga badbaadino ardeydeena iyo shaqaaleheena inagoo hirgalinayna nidaamyo waadixa, caafimaad iyo badqab laga fikiray.</p>
<b>4. Hawlgelinta Daneeyayaasha</b> <i>Yaa ka shaqeeyey (tirada, kooxaha muhiimka ah, iyo doorarka) iyo sida, iyo waxa natijiadu noqotay? Maxaa ardeyda/qoysaska inta ugu badan saameeyey codsigan/dadaalkan?</i>	<p>Wada-xaajoodyadani waxay u dhaxeeyeen degmada iyo midowga, laakiin waxaanu xisaabtu ku darsanay dhibaatooyinka muhiima ee qoysaska, shaqaalaha hugsiga, iyo ardeydu nagala wadaageen waxa muhiim u ah iyaga ee khuseeyaa nidaamyada COVID-19 kulamo bulshoo kala duwan mudada xanuunka.</p>
<b>5. Keeladaha Sinaanta Jinsiga</b> <i>Sidee ayuu codsigan/dadaalkan u yareeyey kala duwanaanshaha una kordhiyey jinsiga iyo saamiga kale? Waa maxay cawaaqibta aan lagu talo galin ee macquulka ah? Istaraatijayadehee ayaa kor u</i>	<p>Iyadoo la hubinaayo in BPS leedahay nidaamyo la isku raacay oo caafimaad iyo badqab oo diyaara, degmada iyo BTU waxay iska kaashan doonaa inay yareeyaa kala duwanaanshaha caafimaad. Wuxaan ugu talogalay waxbarasho gaara oo badqabta iyadoo la maraayo nidaamyada lagu sharxay heshiiskani, sidoo kale istaraatijiyadaha daruuriga ah ee la xidhiidha qeybinta baadhitaano bilaasha oo guriga, siinta fursado talaal, iyo si joogto ah ula xidhiidhida shaqaalaha iyo qoysaska heer dugsi.</p>

<i>qaadaya saamiga?</i>	
<b>6. Miisaaniyada &amp; Hirgelinta</b> <i>Waa maxay saameynta miisaaniyadu? Sidee hirgelintu u xaqijinaysaa in dhammaan ujeedooyinka, gaar ahaan ujeedooyinka la xidhiidha sinnaanta, la gaadhay? Waa maxay kooxaha aqoonsiga kale ee kooxda hirgalita, oo miyey eegi doonaan saamiga?</i>	Qeybaha heshiiskani marhore ayaa lagu daray miisaaniyada sanad dugsiyeedkan. Wax maalgalin dheeriya loogama baahna heshiiskan.
<b>7. Islaxisaabtanka &amp; Isgaarsiinta</b> <i>Sidee ayaa sameeynta loo qiimeyn doonaa, qori doonaa looguna qudbin doonaa daneeyayaasha? Yaa ka masuul noqon doona?</i>	MOA ayaa la hirgalin doonta dugsiga, degmada iyo midowga hogamiyayaasha. Xafiiska Xidhiidhka Shaqaalaha ayaa door muhiima ka qaadan doona hubinta hirgalinta shuraakada Adeegyada Caafimaadka BPS.